Casharka 53

1. Miyaa ninkii curyaanka ahaa awooday inuu is-bogsiiyo?
-Maya.

2. Miyaa ninkii curyaanka ahaa saaiibbadiis ay awoodeen inay bogsiiyaan isaga?
-Maya.

3. Miyaa mid ka mi ah dhakhtarrada awood u lahaa inuu bogsiiyo ninkan curyaanka ah?
-Maya.

4. Yey afartii nin u keeneen ninkii curyaanka ahaan?
-Ciise ayey u keeneen.

5. Yuu ahaa kan keliya oo awooday inuu bogsiiyo ninka curyaanka ah?
-Ciise.

6. Miyaa qofi cafin karaa dembiyada?
-Maya.

7. Miyaa wadaadku cafiyi karaa dembiyada?
-Maya.

8. Waa maxay sababta Ciise u awooday inuu dadka dembiyadooda cafiyo?
-Waayo Masiixu wuxuu ahaa Sayid, ama Wiilkii Ilaah, amaba Rabbi.

10. Muxuu ahaa magaca labaad ee Laawi?



-Matayos.

11. Maxay ahayd shaqada Matayos uu hayey markii Ciise u yeeray isaga?
-Matayos wuxuu ahaa cashuur-qaade.
-Matayos wuxuu cashuurta u ururin jiray reer Rooma, isagoo cashuurta ka soo qaadaya dadkiisa, Yuhuudda ah.

12. Ciise wuxuu Farrisiinta u sheegay in dadka caafimaadka qaba ayan u baahnayn dhakhtar, laakiin, 'buu yiri,' waxaa dhaqtar u baahan kuwa jirran.
-Muxuu Ciise ka wadaa ama uga gol leeyahay xaalkaas? Ciise wuxuu uga gol leeyahay inaanu u imanin inuu bogsiiyo kuwa aan garanaynin inay bukaan ama jirran yihiin.

13. Ciise yuu u yimid inuu badbaadiyo?
-Ciise wuxuu u yimid oo keliya dadka garanaya inay Ilaah ku dembaabeen, iyo kuwa og in Ilaah oo keliya uu badbaadin karo.

-Maalin maalmaha ka mid ah, ayaa qaar ka mid ah Farrisiinta iyo macallimada sharciga ay weyddiiyeen Masiixa inuu u muujiyo calaamad.

Bal anyu akhrinno Matayos 12:38

38-Markaas qaar culimada iyo Farrisiinta ah ayaa u jawaabay oo ku yidhi, Macallimow, waxaannu doonaynaa inaannu calaamo kaa aragno.

-Haddaba intii Haallada Ilaah ay rumaysan lahaayeen, maxay Farrisiinta sameeyeen, oo maxay macallimada sharcigu doonayaan inay arkaan?

-Waxay doonayaan in loo muujiyo calaamda.

-Waa maxay sababta Farrisiinta iyo macallimada sharciga ay Masiixa u weyddiinayaan calaamad?

-Miyaanay maqal oo arkin Ciise oo dadka jinniyo ka saaraya ama ka bixinaya?

-Haa.
-Way arkeen.

-Miyaanay arag oo maqal Ciise oo bogsiinaya ninkii baraska qabay?

-Haa.
-Way arkeen.

-Miyaanay arag oo maqal Ciise oo bogsiinaya ninkii curyaanka ahaa?

-Haa.
-Way arkeen.

-Miyaanay arkin oo maqlin Ciise oo bogsiinaya kuwa isaga u yimaada?

-Haa.
-Way arkeen.

-Maxay haddaba Farrisiinta iyo culimada sharciguba u weyddiinayaan inay calaamooyin arkaan?



-Waayo ma ayan rumaysnayn in Ciise ahaa Sayid iyo wiilka Ilaah, iyo Rabbiga  Badbaadiyaaha ah.

-Intii ay Ciise rumaysan lahaayeen, Farrisiinta iyo culimada sharciga waxay haatan doonayaan inay arkaan calaamooyin mucjiso ah.

-Haddaba miyaad xusuusataa sidii Ilaah reer binu Israa'iil ugu muujiyey calaamooyin badan oo mucjiso ah, welibana ma ayan rumaysan Ilaah.

-Waxaa wahtigaas Ilaah u soo diray Fircoon iyo Masaarida, toban belaayo, welibana Isra'aiil inkastoo ay arkeen mucjisooyinka haddana Ilaah ma ayan rumaysan.

-Ilaah wuxuu Fircoon iyo ciidammadiisii ku qarqiyey Badda Cas, Israa'iilna weli ma ayan rumaysan Ilaah.

-Ilaah wuxuu soo diray doora duureed iyo cunnadii Israa'iil algu quudin jiray markii ay lama-degaanka joogeen, welina ma ayan rumaynin.

-Intii ay rumaysan lahaayeen Masiixa, waxay badanaa dadka imminka doonayaan inay calaamo arkaan.

-Miyaa calaamaddu ina badbaadinaysaa?
-Maya.

-Inaan rumaysanno Ciise oo ah Badbaadiyaha ayaa ina Badbaadinaysa.

-Haddii aynu niraahno Ciise oo keliya ayaannu rumaysanaynaa

markii aynu mucjiso aragno, maxaynu leennahay?

-Waxaynu leennahay Ciise waa beenaale.

-Haddii aynu rumaysanno in Hadallada Ilaah ay xaqiiqo yihiin mrkii aynu calaamado aragno oo keliya, maxaynu dadka u sheegaynaa?

-Waxaannu marka dhanka kale laga eego xaajjada aynu leennahay Hadallada Ilaah waa been.

-Maxaa Masiixa uu ugu jawaabay Farrisiinta iyo culimada sharciga?

Bal aynu akhrinno Matayos 12:39

39-Markaasuu wuxuu u jawaabay oo ku yidhi, Qarni shareed oo sina leh ayaa calaamo doonaya, calaamona lama siin doono calaamada nebi Yoonis maahee,

-Maxaa Masiixu imminka iyaga uu ku leeyahay?

-Ciise wuxuu leeyahay kuwa dulliga ah oosinaystayaasha ah ayaa calaamad weyddiista.

-Maxay ahayd calaamadda keliya taasoo Ciise uu yiri, waxaan siin doonaa dadka?

-Calaamadda Yoonis.
-Waa maxay calaamadda Yoonis?

Bal aynu akhrinno Matayos 12:40



40-Waayo, sida Yoonis saddex maalmood iyo saddex habeen caloosha nibiriga ugu jiray, sidaasuu Wiilka Aadanahuna saddex maalmood iyo saddex habeen caloosha dhulka ugu jiri doonaa.

-Maxay ahayd calaamaddii Yoonis?

-Isla sidii nebi Yoonis uu caloosha nibiriga ugu jiray saddexda maalmood iyo saddexda habeen, isla sidaas ayuu Masiixu caloosha dhulka ugu jiri doonaa saddex maalin iyo saddex habeen.

-Isla sida Ilaah Yoonis uga soo bixiyey caloosha nibiriga saddex maalin iyo saddex habeen dabadeed, isla sidaas oo kale ayaa Ciise saddex maalmood iyo saddex habeen dabadeed looga soo bixin doonaa caloosha dhulka.

-Ciise wuxuu Farrisiinta u sheegayey iyo macallimada sharciga in calaamadda Yoonis ay ahayd calaamad sheegaysa in Isaga Ciise ah uu ahaa Rabbiga Badbaadiyaha ah, maaddaama uu ahaa Wiilkii Ilaaha Nool.

-Maxaa Ciise u shegay Farrisiinta iyo culimada intaas kaddib?

Bal aynu akhrinno Matayos 12:41

41-Nimanka Nineweh waxay xisaabta isla taagi doonaan dadka qarnigan, wayna xukumi doonaan, waayo, waxay ku toobad keeneen wacdigii Yoonis, oo bal eeg, mid yoonis ka weyn ayaa halkan jooga.

-Yoonis wuxuu u tegey dadkii sharka lahaa ee Ninweh, oo wuxuu

u sheegay iyaga inay ka soo noqdaan dembigooda, haddii kale 'buu yiri,' waxaa idinku dhici doona ciqaab Ilaah xaggii idiinka imanaysa.

-Maxay haddaba dadkii Nineweh sameeyeen?

-Waxay maqleen Hadallada Ilaah soo marsiinayo Nebi Yoonis, oo waxay ka toobad keeneen dembiyadooda.

-Miyaa Dadka Nineweh garanayaan ballamada Ilaah ee la siiyey Mibraahim, Isxaaq, iyo Yacquub?

-Maya.

-Miyaa dadkii reer Nineweh garanayaan amarrada Ilaah ee loo soo dhiibay addoonkii Muuse ahaa?

-Maya.

-Miyaa dadkii reer Nineweh garanayeen  mucjisooyinka iyo calaamadaha Ilaah u sameeyey Israa'iil?

-Maya.

-Inkastoo weliba dadka reer Ninewewh ayan waxba ka ogayn waxyaabahaas oodhan, haddana waxay ka toobadkeeneen dembiyadooda markii nebi Yuunis loo soodiray.

-Imminka, waxaa halkan jooga mid Yuunis ka weyn, oo wuxuu dadka u sheegayaa inay toobad keenaan.

-Waa kuma kan ka weyn Yoonis?



-Ciise, oo ah Ilaaha Badbaadiyaha ah.

-Sidee buu Ciise kaga weynaa nebi Yoonis?

-Yoonis wuxuu ahaa qof caadi ah, laakiin Ciise wuxuu ahaa nin dhan iyo Rabbi.

-Inkastoo Ciise ahaa Rabbiga Badbaadiyaha ah Yoonisna ahaa qof caadi ah, Yuhuuddu waxay diideen inay rumaystaan Ciise.

-Waa maxay sababta Ciise u leeyahay Yuhuuddu ay ka shar badan yihiin reer Ninewewh?

-Waayo dadka reer Nineweh waxay maqleen Ilaah, markii nebi Yoonis u yimid, Yuhuudduna kuma ayan toobad keenin waxbariddii Ciise, oo ahaa Rabbiga Badbaadiyaha ah.

-Weliba in kastoo Ciise Yuhuudda baray inay toobad keenaan oo uu sameeyey calaamooyin badan, Yuhuuddu waxay diideen in Ciise ahaa Rabbiga Badbaadiyaha ah, maaddaama uu ahaa Wiilkii Ilaah.